Sharci Lambar 7 Tr. 26 Jan. 1989 Oggolaasho Bankiyo Gaar Ahaaneed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa Laga furi karaa Bankiyo gaar ahaaneed (Private Banka).

Qodobka 2aad.

Furitaanka Bankiyada ku tilmaaman qodobka hore waxaa Oggolaanaya Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta, isagoo dhegeystay talada Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.

Qodobka 3aad

Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed wuxuu ku xeelanayaa Bankiyada kor ku xusan awood baariseed kormeer iyo jiheyn ee ku tilmaaman Xeer sharci lambar 6 ee 19 oktoobar 1968 oo Loo raagay sharci lambar 27 ee 26.11.1968 iyo beddelaaddii ka danbeysay.

Qodobka 4aad

Waxaa la buriyay sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho. 26 Jan 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)